





MN **Epilepsy Group**®

Khibrad sare. Daryeel Dhamaystiran.



Adeegyada



Kooxda suuxdinta ee Minnesota waa hogaamiye wadanka laga aqoonsan yahay dhinaca daryeelka dhamaystka tiran ee ay siiyaan dadka leh miyir doorsoonka iyo xanuunada suuxdinta. Kooxdayadan balaadhan ee takhasuska ku leh suuxdimaha caruurta iyo dadka waawayn waxaanu bixinaa noocyo dhamaystiran oo habraacyo daryeelka suuxdinta ah.

### **DARYEELKA BUKAANKA DHAKHTARKA**

Kooxda suuxdinta ee Minnesota waxay isku amaantaa inay ku siiso daryeelkii ugu danbeeyey deegaan ku haboon bukaanada dadka suuxdinta leh. Dhamaan dhakhtaradayadu waxay leeyihin takhasus neerfaha oo shahaado ka haysta guddida isla markaana leh takhasusyo tababar hoosaadyo dheeraad ah. Takhasuslayaashayadu waxay sameeyaan qiimayn iyo daawayn noocyo badan oo xanuuno ah oo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku koobnayn, miyir doorsoonka cusub ee bilawga ah/suuxdinta, maareynta wakhtiga dheer, culus, ay adagtahay in la daweeyo, suuxdinta culus ama xanuunada miyir doorsoonka ee naadirka ah.

Ka dib marka la sameeyo qiimayn faah-faahsan oo dhamaystiran, fikirkii baadhitaan iyo daawaynta suurto galka ah ayaa la siiyaa.

### **DHAKHTARADA TAKHASUSKA AH**

Kooxdayada suuxdinta ee Minnesota waxaanu aaminsanahay in daryeelka dadka suuxdinta leh aanu u qabano sida ugu fiican oo habraac iskaashi kaasi oo ku salaysan danaynta bukaanka iyo qoyskaba. Waxaanu aas-aasnay dhakhtaro takhasus ku ah kuwaasi oo naga caawi inay daweeyaan qofka gabigisaba halkii ay cudurka oo kaliya ka dawayn lahaayeen.

### **DHAKHTARKA HIDDE SIDAHA**

Hide tijaabinta dadka suuxdinta leh waxay caawinaysaa in la ogaado hidaha sababay suuxdinta. Dhakhtarkan takhasuska ah dhexdiisa bukaanku wuxu maraa tijaabooyin iyo qiimayn faah-faahsan oo uu ku sameeyo khabiirka hormuudka u ah suuxdinta hidaha ah. Dhawr bukaan, natiijooyinka tijaabada hiddaha waxa sidoo kale laga yaabaa inay caawiso in la helo qorshe gaar ahaaneed oo daawayn ah.

### **DHAKHTARKA NOPE IYO CANOE**

NOPE (Suuxdinta caruurta ee bilawga ah) waa barnaamij edbin badan oo gaar ah oo wax ka qabta baahiyaha caafimaad, cilmi nafsiga, iyo cilmi-nafsiga ee carruurta iyo dhalinyarada ee dhawaan laga helay cudurka suuxdinta.

Dhakhtarka CANOE (Qiimayn Dhamaystiran oo suuxdinta cusub ee billawga ah) waa siyaasad caafimaad oo takhasusaad badan, cilmiga neerfaha, iyo baahiyaha cilminafsiyeedka bulshada ee dadka waawayn ee dhawaan laga baadhay suuxdinta.

Labada dhakhtarba waxay awooda saarayaan qiimayn dhamaystiran 360 oo bukaanka ah oo ay samaynayaan koox foajigan oo takhasuslayaal ah si ay u caawiyaan in ay helaan una sheegaan kuwo badan qaybo aan suuxdinta la xidhiidhin oo daryeelka miyirdoorsoonka ah.



## DHAKHTARKA NEE

Dhacdooyinka aan suuxdinta ahayn (NEE) waa xalqado matalaya miyirdoorsoon suuxdin ah laakiin aanay sababin hawlo signalada maskaxda oo aan caadi ahayn. Bukaana NEEs waxay muujiyaan calaamado jidheed oo fara badan, oo ay ka mid yihiin is badal foajignaanta ah, dareenka, iyo dhaq-dhaqaaqa. Barnaamijkani waxa uu caawiyaa dadka leh NEEs isagoo siinya baadhitaan iyo qorshe daawayneed oo sax ah.

## TAP (Transition-Age Program) CLINIC

TAP wuxu ka hadlaa caafimaad, cilminafsiga bulshada, waxbarashada, baahiyaha camal ee dhaliyarta leh suuxdinta marka ay sii waynaanayaanba. Waa nidaamka ku saleysan qoyska oo loogu talagalay dhanka kala guurka daryeelka ee dhakhtarka adeeg bixiyayaasha waayeelka ee caruurta oo xidhiidh dhow la leh adeeg-bixiyayaasha Kooxda Minnesota Epilepsy Group.

## TSC DHAKHTARKA(Burooyinka Jidhka ka soo baxa)

Burooyinka Jidhka ka soo baxa. (TSC) waa xaalad caafimaad oo naadir ah, badanaa ay sababto xanuun hidde sidaha ah, kaasi oo ay ka dhashaan burooyin aan kasar ahay kuwaasi oo ka dul baxa xubno muhiim ah oo dhawr ah, oo ay maskaxdu ka mid tahay. Kooxda suuxdinta ee Minnesota waxay ahaayeen kuwa uga horeeya ee hogaaminaya daawaynta bukaana leh TSC. Dhakhtarka TSC ee kooxda suuxdinta Minnesota wuxu u shaqeeyaa xarun dhakhtar oo isku xidh ah isla markaana maaraysa dhamaan xaaladaha adag ee la xidhiidha cudurkan. Kooxda suuxdinta ee Minnesota waxa lagu yaqaanay inay yihiin xarunta burooyinka jidhka (TSC) ee aadka u fiican, waxaana u yaqaana xulufadooda TSC.



## **ADEEGYADA CILMI NAFSIGA**

Cilmi nafsigu waa barashada maskaxdeena, fikirkeena, iyo dabeecadaheena. Dhakhtarkeena cilmi nafsigu wuxu qiimeeyaa, baadhaa, daweeyaa carqaladaha niyada, walbahaarka, cabashooyinka maamulka dabeecada caruurnimo, dhacdooyinka aan suuxdinta ahayn, iyo xaaladaha kale ee caafimaad ee maskaxda kuwaasi oo ku badan dadka leh suuxdinta. Waxay badanka la shaqeeyaan bukaana si ay u dhisaan xirfadaha wax ka qabashada una siiyaan caawimo si ay uga caawiyaan inay maamulan sababayaasha isku buuqa nolosha maalinlaha ee la xidhiidha dawakhaad. Dhakhaatirteena cilmi-nafsigu waxay si dhow ula shaqeeyaan koox caafimaad si ay u siiyaan bukaana daryeel balaadhan, oo dhameystiran.

## **ADEEGYADA CILMI NAFSIGA MASKAXDA**

Cilmi-nafsiga maskaxdu waa barasho hab-dhaqanka iyo xirfadaha la xidhiidha qaab-dhismeedka maskaxda iyo nidaamyada. Qiimeynaha cilmi-nafsiga maskaxdu wuxuu ku lugleeyahay xasuusta bukaanka iyo xirfadaha kale ee fikirka. Natiijooyinka baadhitaanada cilmi-nafsiga maskaxdu wuxuu door muhiima ka ciyaaraa baadhitaanka iyo u abuurida qorshe daawo saxa dadka leh dawakhaada. Qiimeynahan waxay waxtar u yeelan karaan aqoonsiga dhibaatooyinka maskaxda ee la xidhiidha suuxitaanka iyo daawooyinka suuxitaanka. Hoos waxa ah hordhaca baadhitaanka cilmi-nafsiga maskaxda ee Minnesota Epilepsy Group siiso bukaanada:

- Qiimeynta xasuusta iyo caqabadaha kale ee maskaxda ee dadka leh dawakhaada
- Qorsheynta qaliinka ka hor iyo qiimeynta daaweynta ka hor, bukaanada maraya daaweynta qaliinka dawaakhada
- Qiimeynta ADHD, waxbarashada naafada, diyaarinta waxbarashada
- Qiimeynta lagu kala saarayo xaaladaha kala duwan ee ay ku jiraan xanuunada maskaxda sida xanuunka Alzheimer, faaluga, iyo niyadjabka



## **ADEEGYADA SHAQADA BULSHADA**

Dadka leh dawakhaadu badanka waxay waajahaan caqabadaha dugsi, shaqo, dirawalnimo, iyo nolosha qoyska. Shaqaalaha Minnesota Epilepsy Group waxay ka caawiyaan bukaanada iyo qoysasku inay fahmaan oo maamulaan sida dawakhaadu u saameeyso noloshooda maalinlaha ah. Shaqalaha bulshada ayaa qiimeyn doona arimahan caamka oo siin doona bukaanada qoyskiisa/keeda macmluumaad iyo khayraad.

## ADEEGYADA BUKAAN-JIIFKA

Dhakhaatiirta, khubarada xirfada sare leh, iyo shaqaalaha adeega bulshada Minnesota Epilepsy Group ee cisbitaalo badan oo kala duwan dhanka metro area oo ay ku jiraan Cisbitaalka Caruurta MN ee St. Paul iyo Minneapolis, United, Abbott Northwestern, Robbinsdale Hospital, Maple Grove Hospital, iyo Mercy. Cisbitaaladan waxaan siinaa adeegyo kala duwan oo ay ku jiraan EEG, talinta dhakhtaatiirta, adeegyada cilmi-nafsiga maskaxda, adeegyada cilmi-nafsiga iyo adeegyada shaqada.



## ADEEGYADA EEG

EEG waxay u saamaxaysaa dhakhtarku inuu fiiriyo oo turjumo mawjadaha maxkaxda bukaanka. EEG waxay muhiim u tahay baadhitaanka iyo raacida horumarka bukaanada leh dawakhaad iyo xaalado maskaxeed oo kale. Adeeg-bixiyayaasha iyo dhakhaatiirta Minnesota Epilepsy Group waxay ku takhasuseen EEG. Waxaanu leenahay mid ka mida adeegyada EEG ee ugu weyn gobolka, waxaan ku bixinaa adeegyo dhowr madalood oo kala duwan.

- Qeybta Kormeerka Dawakhaada (EMU) Dhakhtarka Bukaankiiifka iyo kormeerka Waayeelka ee EEG dadka leh dawakhaada
- Dhakhtarka Bukaankiiifka iyo kormeerka Waayeelka ee EEG dadka leh astaamaha maskax xanuunka
- Adeegyada Daryeelka kormeerka EEG ee dadka waaweyn ee aadka u ildaran iyo caruurta
- Kormeerka caruurta dhalatay aadka u xanuusanaysa ee EEG
- Canjalada EEG (sEEG) kormeerka bukaanada maraya qiimeynta qaliinka dawakhaada
- Dhakhtarka Bukaankiiifka iyo Waayeelka EEG ee 2 goobood ee shaybaadhka
- Adeegyada ilaalinta bukaankiiifka socodka EEG ee guriga bukaanka
- EEG baadhitaanka Wada oo ka qeyba qiimeynta qaliinka dawakhaada ama nabarada maskaxda
- EEG ee sawirada PET oo ka qeyba qiimeynta qaliinka dawakhaada
- Kormeerka EEG ee nidaamyada qaaliinka qaar
- Buaanka socodka habeen jooga ah EEG ee goobaha EEE ee cusub Roseville Clinic



### **ADEEGYADA MSI (Sawirada mganadka)**

Magnetoencephalography waa tiknoolajiyad dareemaysa hawlaha maskaxda ee suuxsan. MSI waxay isticmaashaa magnetoencephalography si ay u aqoonsato meelaha shaqooyinka kakan iyo suuxitaanka ee maskaxda. Waxa lagu isticmaalaa qiimeynta qaliinka ka hor ee dawakhaada iyo nabarada maskaxda ee bukaanada. Adeegan wuxuu door muhiimka ka ciyaaraa sameynta qorshayaal qaliin oo guul u leh bukaanada.


Minnesota Epilepsy Group waa hogaamiyaha adeegyada MSI. Kaliya 13 gobol ayaa leh xarimo shahaado u haysta ACMEGS dalka oo dhan. Taayadu waa xarunta kaliya magnetoencephalography/MSI ee 300+ mayl si joogta ahna u siisa daryeel bukaanada Minnesota, Dakotas, Wisconsin, iyo Iowa.

### **ADEEGYADA CILMI-BAADHISTA**

Minnesota Epilepsy Group waxay bixisaa daaweynta ugu iican iyo macluumaadka dawakhaad iyo suuxitaanka. Waxaan si joogto ah uga qeybgalnaa tijaabooyinka shaybaadhka ee bixinaya daaweyn cusub oo ay ku jiraan daawooyinka cusub iyo agab caafimaad. Waxaanu ka qeybgalnay dhowr tijaabo shaybaadh oo waaweyn dhanka Dawakhaada. Si aad u heshid liiska daraasadaha cilmi-baadhista hada aanu iska diwaangalinay ama shuruudaha isdiwaangalinta daraasadaha fadlan booqo wabsaaydkeena.

[www.mnepilepsy.org/epilepsy-research/clinical-trials](http://www.mnepilepsy.org/epilepsy-research/clinical-trials)





## **DAAWEYNTA QALIINKA**

Haddii suuxitaanku sii jiro inkastoo la isku dayey ugu yaraan labo daaweyn oo ka hor tagaysa suuxitaanka, bukaanadu waxay lahaan karaan dawakhaad aan la xakameyn karin. Inkastoo dhowr daawo caafimaad lasii helaayo, daaweynta qaliinka ayaa noqon karta ikhtiyaarka bukaanada leh dawakhaad aan la xakameyn karin.

Khubaradeenu waxay ku takhasuseen, oo ay dhammaan bixiyaan, daawooyinka qaliinka ee ugu heer sareeya. Hoos waxa ah liiska daawooyinka qaliinka ee laga bixiyo Minnesota Epilepsy Group.

### Qaliinka AanLaxakameyn

Qaliinka aan la xakameynkarin, ama ka saarida dhaawaca qaliinku waa Heer Dahabiya oo daawooyinka qaliinka dawakhaada oo siin kara heerarka ugu sareeya ee xakameynta suuxitaanka. Haddii khabiiir aqoonsan karo qeyb yar oo maskaxda ah taasi waxay noqon kartaa masuuliyada suuxitaanka qaliinkani ku taliyey.

### SEEG (Stereoelectroencephalography)

SEEG waa farsamo qaliin yar oo loo isticmaalo in lagu dareemo dhadhaqaaqa elektarig, oo lagu aqoonsado goobta suuxitaanku ka yimid, toos maskaxda. Inta lagu jiro nidaamka SEEG dhakhtarka maskaxdu wuxuu dhigaa qalab aad u yar meelo gaara oo maskaxd ah. Isagoo turjumaaya hawlaha maskaxda ee dhowr cisho (cisbitaalka dhexdiisa) dhakhaatiirteenu waxay ogaan karaan meesha suuxitaanku kasoo jeedo.

### DBS (Kicinta Maskaxda)

DBS waa aalad keenaysa elektarig yar, gudaha maskaxda, marmar kala duwan. Iyadoo sidaasi la sameynaayo, waxay si taxadir leh u yareynaysaa soo noqnoqshada, mudada, iyo ama heerka suuxitaanka ee bukaanada badankooda.

### RNS (Responsive Neurostimulation; Neuropace®)

Nidaamka RNS waa daaweyn takhasus ah oo si joogto ah u ilaalisa hawlaha elektarig ee maskaxda iyadoo isticmaalaysa qalab lagu rakibay. Nidaamka RNS wuxuu dareemaa shaqooyinka elektarig ee caadiga wuxuuna joojiyaa suuxitaanka isagoo u gudbinaaya elektarig kooban goobta suuxitaanka marka la dareemo.

### VNS (Kicinta Neerfaha)

Daaweynta VNS waxay yareysaa tirada, xadiga iyo/ama darnaanta suuxitaanka iyadoo isticmaalaysa qalab lagu rakibay oo garaac yar leh qoorta. Tani waxay si taxadir leh u yareynaysaa soo noqnoqshada, mudada, iyo ama heerka suuxitaanka ee bukaanada badankooda.



MN **EpilepsyGroup**<sup>®</sup>

Khibrad sare. Daryeel Dhamaystiran.

# NALASOO XIDHIIDH

2720 Fairview Avenue North, Suite 100, Roseville, MN 55113

6545 France Avenue South, Suite 335, Edina, MN 55435

[www.mnepilepsy.org](http://www.mnepilepsy.org)

651.241.5290

Nagalasoco



Facebook



LinkedIn



Wabsaayd

